

WAXA LA II OGOL YAHAY INAAN JOOGO HALKAN” – ASAL KHIBRADEEDA SHAKHSIYAADKA MUHIIMKA EE SAMEN

Asal waxay heshay shucuur xornimo iyo caawimo cusub imika oo ay ku nooshahay Netherlands. Sheekadeedu waa mid ku saabsan caqabado iyo guulo intii ay la qabsanaysay dal cusub, gaar ahaan qof yaroo dhallinyaro ah, iyo sida shakhsiga muhiimka Mahsa ee mashruuca SAMEN u uga caawiye arintan.



Warka Asal

Asal waxay ahayd 18 sano jir markii ay kasoo qaxday liraan ee ay timid Netherlands sanad kii hore iyadoo sababtu tahayd in aanay ku dareemayn badqab dalkii ay u dhalatay. Dhanka Netherlands waxay: "Way fiican tahay inaad xor noqotid waayo waxaan la joogi karaa gabadha aan asxaabta nahay markasta oo aan rabo", waxa tiri Asal. "Maaha inaan qofna ka qariyo. Wuxuu la ii ogol yahay inaan joogo halkan."

Asal way ku fiican tahay halkan, laakiin taasi maaha muhiim. Khibradaheeda liran iyo xarumaha xadhiga ee ay ugu noolayd si kumeelgaadha, ayaa saameyey gabadaha reer liraan. Waxay u baahatay caawimo si ay ula tacaasho uur-ku-taaloooyinka una xoojiso caafimaadkeexda maskaxda si ay dhexgasho bulshada Netherlands.



Shakhsiga muhiimka ah Mahsa

Waxay ka heshay caawimadaan Mahsa, oo ka qeyb ah mashruuca SAMEN oo ah shakhsiga muhiimka ah. Shakhsiyadka muhiimka ah – ama Dhexdhexaadiyayaasha dhaqanka– ayaa sameeya xidhiidh u dhaxeeyaa soo galaytga iyo adeegyada Dutch ee kala duwan. Waxay u damaanad qaadaan caawimada dhaqan ahaan xasaasia ah dadka u baahan.

Labadoodu waxay isku barteen markii koobaad mashruuca SAMEN. Asal waxay markiiba ku dareentay badqab Mahsa, gaar ahaan daryeelkeeda iyo naxariisteeda: "Shucuurteeda oo dhan iyo qaabka ay u dhageysato kalmad kasta oo ay tiraah, ayaa i siisa shucuur badqab," ayey sharxaysaa. Kalsoonidan darteed, Asal waxay ku dhiiratay inay kala hadasho arimaha gaarka ah Mahsa, sida dhibaatooyinka ay waajahado qof ahaan ee dadka ku xeeran.

Soo galaytiga cusub waxay ku waajahaan caqabado waaweyn guud ahaan dalka cusub. Asal waxay sharxaysaa khibradeedii koobaad ee nidaamka waxbarashada Dutch, tusaale ahaan "Bilowgii waxaan dareemay ajaanib. Wuxaan ahaa kaligay oo inta ugu badan ardaydu way ka yaryaraayeentaa intaan ahaa," ayey xusaysaa. "Imaanshaha dal cusub oo aana garaneyn luuqadu aad bay u adag tahay. Wuxaad markasta ka fikiraysaa in dadku kaa hadlayaan adiga."

Caawimada Mahsa aad ayey muhiim ugu ahayd Asal, gaar ahaan latacalida xukunka dadka kale. "Mahsa waxay i bartay in aanan ka baqan dadka aan saameyn ku lahayn noloshaada," wuxa tiri Asal. "Haddii ay kuu fiican yihiin, waa la socon kartaa, haddii kale, iska dhaaf."

Caawimada Mahsa way ka badan tahay tilmaam shucuureed. Waxay sidoo kale ka caawisay Asal arimo toos ah sida mashaariicda dugsiga. "Saddex maalmood kahor waxay iga caawisay mashruuca dugsigayga. Wuxaanu ka wada shaqeynay ilaa saddex saacadood," wuxa tiri Asal. Caawimada Mahsa sidoo kale waxa kujiray sharxida nidaamka waxbarasho ee cusub oo adag iyo latacalida dhaqamada kala duwan ee dugsiga.

Fiirinta mustaqbalka

Filasha mustaqbalka, Asal waxa ka go'an inay uga sameyso mustaqbal fiican Netherlands. Hadafyadeedu waa inay horumarisa luuqadeeda Dutch ka, aado jaamacad oo ay bilowdo nolol.

Asal waxay tiixgalinaysaa inay aado jaamacad. "Waxa laga yaabaa wax la xidhiidha xuquuqda dumarka iyo dumarnimo. Wali waan go'aansanayaa," ayey tiri. Khibradaheeda ayaa ku dhiirigaliyey inay caawiso dadka kale ee waajahaya caqabado lamid ah. "Wuxaan rabaa inaan horumariyo naftayda, caawiyo dadka sidayda oo kale oo aan sameeyo isbaddel," ayey tiri. "Wuxaan jeelaan lahaa inaan ka xoreeyo mushkiladaha."

Asal waxay ku dhiirigalinaysaa dadka kale inay xooganaadaan oo ay raadiyaan caawimo marka loo baahdo. "Halkan Netherlands, waxaad haysataa xoriyad. Waxa jira dad badan oo raba inay ku caawiyaan, hadaba raadso oo weydiiso caawimo. La xidhiidh oo ka caawi naftaada sameysashada mustaqbalka fiican," ayey ku waanisay.

Miyaad haysaa khibrado rabshad la xidhiidho galmo iyo jinsi oo aad rabtid inaad ka hadashid? Halkan waxaad ka heli kartaa macluumaad badan oo khuseeyaa saacadaha latalinta ee dhexdhexaadiyayaasha dhaqanka iyo xirfladlayaasha caafimaadka ee [Doctors of the World](#).

